

Warbixinta waalidiinta ee ku saabsan awaamiir la farayo waalidka

Waa maxay awaamiirta lafarayo waalidku

Haddii Cunug(ilmu yar) ama mid dhaliyaro ah uu dhibaato qabo, taas oo keenaysa in horumarkiisa ama horumarkeedu uu khatar ku jiro, degmadu waxa ay sameyn kartaa, in qofka leh masuuliyada waalidnimo ay siiso awaamiirta la farayo waalidka. Awaamiirta la farayo waalidku waa howlo mid ama dhowr ah oo si gaar ah loo habeeyay. Taas oo ay degmadu sharuudo ku xireyso, in waalidku uu xil iska saaro in uu caawiyo ilmaha. Awaamiirta la farayo waalidka waxa la siiyaa oo kaliya, haddii ay degmadu u aragto in ay waalidku awoodaan in ay caawiyaan oo ay ku garab taagnaadaan ilmaha faydaqab wanaagsan iyo horumar.

Degmadu waxa ay tusaale ahaan sharuudo ku xiri kartaa waalidku in:

- In ay ilaaliyaan in ilmahoodu uu yimaado dugsiga.
- Ka qeyb qaataan kulamada waalidiinta ee dugsiga ee khuseeya ilmahooda.
- Ilmahooda in ay u raacaan hiwaayadaha waqtiyada firaaqada.
- Hubsadaan, in ilmahu yimaado guriga waqti go'an.
- In ay helaan talo bixin iyo hagd ay ku tarbiyeeyaan ilmahooda..
- Ka qeyb qaataan kulamada degmada ee xal kagaarista dhibaataada ilmaha..

Sababta ka dambeysa awaamiirta la farayo waalidka

Ujeedada laga leeyahay awaamiirta lafarayo waalidka iyo waajibaadyada waa in la caawiyo oo laga taageero waalidiinta sidii ay ilamahooda u tarbiyayn lahaayeen.

Awaamiirta la farayo waalidka waxaa loogu talo galay waalidka, awooda in ay qaadaan masuuliyadooda waalidnimo, laakiin isla markaana u baahan caawimaad iyo taageero. Degmadu wey rabtaa in ay caawiso waalidka, haddii degmadu u aragto in taas loo baahan yahay. Sidaa darteed ayey degmadu waalidka ugu yeerayaan kulan ku saabsan awaamiirta lafarayo.

Sidee ayuu u dhacayaa kulanka ku saabsan awaamiirta lafarayo waalidka

Degmadu sida caadiga ah inta ayna sameyn awaamiirta la farayo waalidka waxa ay ugu yeeraan kulan waalidiinta.

Kulanku waa kulan wadashaqeyneed, oo uu lataliye xaga arimaha bulshada ah(en socialrådgive) uu kala qeyb qaadanayo waalidiinta, waxa kale oo laga yaabaa in turjubaan ka qayb qaato. Ujeedada kulanku waa in si wadajir ah loogu helo xal, waxa ay tahay in waalidku ay sameeyaan si ay ugu dhaliyaan habsami u socod iyo hurumar ilamahooda yar ama kooda dhalinyarada ah, oo ay u abuuraan fursado wanaagsan oo ilmuhu ama kan dhilinyarta ah ay ku heli karaan waxbarsho ama shaqo..

Iyada oo lagu salaynayo kulanka ku saabsan awaamiirta waalidka , waa in ay degmadu si wadajir ah waalidiinta ula samaysaa qorshe ku saabsan , howlihii iyo waajibaadkii saamayn ku yeelan lahaa in waalidku uu guto masuuliyadii waalidnimo. Kulanka waxa kale oo looga hadlayaa, sidii loola socon lahaa balamihii lagu heshiiyay kulanka.

Sharciga awaamiirta lafarayo waalidka waxa uu xambaarsan yahay, in degmadu ay joojiso lacagaha ilmaha isla markaana la xakameynayo kabista guryaha, haddii waalidku uu ka soo bixi waayo howlihii

lagu balamay iyo waajibaadkii, haddii aanay markaa jirin xaalado gaar ah oo taas sharaxaad ka bixin kara.

Filim ku saabsan awaamiirta lafarayo waalidka

Eeg [Socialstyrelsen.dk /forældrepålæg](https://www.socialstyrelsen.dk/forældrepålæg) waxa aad ka heleysaa filim ku saabsan masuuliyada waalidka, iyo muhiimada ay leedahay wada shaqeynta waalidka, macalimiinta, barbaariyayaasha iyo lataliyayaasha arimaha bulshada ee ku saabsan ilmaha horumarkooda iyo habsami u socodkooda.